

Miyaad ka walwalsantahay in ilmahaaga looga faa'iidaysto iyadoo dambi la galinayo?

Ma u malaynaysaa in ay ku lugleeyihiin in ay iibiyaanmaan-dooriye (drugs) ama noocyo kale ee ficil dambi(criminal activity)? Miyaad dhawaantaan ku aragtay amaka dareentay isbaddal ku dhacay dhaqankooda ama dabcigooda adiguna aadan fahmin waxa sababay?

**Waa maxay micnaha dambi uga faa'iidaysi?** (What does criminal exploitation mean?)

'going cunch', 'going country', 'going OT'

- Marka ay carruurta isticmaalaan dadka qaarkiis, oo marmarka qaarkod ah burcad ama kooxo kale (gangs/groups) una adeegsadaan afcaal ama fal dambiyeed sida metel in ay qaadaan ama iibiyaan maan-dooriye ama hub (drugs/weapons), in ay ku lugyeeshaan lacag lagala baxo makiinadaha tigidhada (running money through ticket machines) iyo iyagoo caawiya **burcadda**.
- Da'yartu waxay marmarka qaarkood ku magacaabaan 'going cunch', 'going country', going OT' Young people sometimes call it
- Carruurta waxaa marmarka qaarkood loo diraa meelo dibedda ka ah degaankooda waxaana laga yaabaa in ay ayaamo maqan yihiin mararka qaarkood
- Marka ay carruurta adeegsadaan dad waaweyn si ay u galaan fal dambiyeed si ay uga munaafacsadaan ama uga faa'iidaystaan dadkaas waawayni ama kooxaha burcadda ahi, taasi waa **isticmaal ama ka faa'iidaysi iyo ku shaqaysi sharci darro ah** (exploitation and trafficking).

*Waxaa muhim ah in la ogaado in **adigu aadan ahayn kaligaa** isla markana aadan ahayn eedaysanee (**you are not alone and not to blame**). Waxaa jira waalidiin badan iyo daryeelayaal (carers) oo ku sugan waaladaas oo kale waxaana jira waxyaalo aad ku caawin kartid ama tillaabooyin aad qaadi kartid in aad difaacdid ilmahaaga:*

- Walwalkaaga gaarsii Daryeelka Bulshada ee Carruurta (Children's Social Care). Daryeele bulsho (social worker) ayaa kugu caawin kara tillaabooyin lagu ilaalin

karo ama lagu difaaci karo ilmahaaga. Waxay samaynayaan qiimayn ama baaris (assessment) ku saabsan walwalka ah in ilmahaagu uu ku sugan yahay khatar dibedda ka ah qoyska.

- Haddii aad u baahan tahay ama jeceshahay caawimaad dheeraad ah, waxaad u tagtaa ama raadsataa xirfadleyaal kale (other professionals) kuwaasoo ku caawin kara: sida Dhaqtarkaaga (GP), Iskuulka, Booliska ama u adeege da'yarta (youth worker).
- Booliska ayaad gaarsiin kartaa oo ad oran kartaa ' waxaan anigu tuhunsanahay ama ka shaki qabaa in ilmahayga loogu shaqaysanayo ayadoo loo isticmaalayo in la galiyo fal dambiyeed'.
- Haddii ilmahaagu aanu joogin halkii laga rabay inuu joogo, si toos ah u gaarsii 101 una sheeg inuu maqan yahay ama la la'yahay. **Ma aha in aad sugtid 24 saac** (you do not have to wait 24 hours).
- Haddii ilmahaaga lagu qaaday gaadhi/baabuur, ama uu haystay tigid tareen ama bas, xusuus qor ka same macluumaadkaan (keep a record) si aad u siisid booliska ama adeege bulsho (social worker)
- Waxaa jiri kara caddaymo kale oo lagu isticmaali karo ilmahaaga sida in lagula sheekaysto baraha bulshada (social media), lacag aan la sheegi karin ama la micnayn karin halka ay ka timid, dhar ama hadiyado, dhaqankiisa oo isbaddalay ama doorsoomay; isku day in aad diiwaan galisid intaasoo dhan ama ka samaysid xusuus qor intii suurto gal ah.

### **Haka walwalin in aad la xiriirtid booliska – waxa aad isku dayaysaa in aad difaacdid ilmahaaga**

- Ilmahaaga lala hadal waxa aad ka walwalsantahay
- Ogaysii iyaga in aanay dhibato ku sugnaan adiguna aad walwalsantahay
- Waxaa laga yaabaa in adiga iyo qoyskaaga ay handadayaan ama u hanjabayaan dadka isticmaalaya ilmahaaga. Waxaa laga yaabaa in uu ilmahaago u malaynayo ama rumaysan yahay in ay kuwaasi ku difaacayaan. Ilmahaaga u sheeg in aad ogtahay khatartaan isla markana aysan dadkaasi lahayn mas'uuliyad ay kugu difaacaan

### **Waxaa jira calaamado kale oo tilmaamaya in qof lagu shaqaysanayo isla markana looga faa'iidayanayo qaab fal dambiyeed ah adiguna waxaad caawimaad ku heli kartaa qaabab ama dariiqyo kala duwan**

(There are other signs that someone may be being trafficked and criminally exploited and you can get help in many different ways)

- Haddii aad si degdeg ah (immediate) uga walwalsantahay ammaanka ilmahaaga waxaad wacdaa 999
- Haddii welwelka aad ka qabti ilmahaaga uusan ahayn degdeg (immediate), fadlan la xariir Adeegga Degaanka ee Kooxda Ilaalinta ammaanka Carruurta (Local

Children's Services Safeguarding team) ama wac lambarka khadka caawimaadda 08088005000 ee NSPCC

- Haddii uu ilmahaagu doonayo in uu dad la hadlo wuxuu wici karaa KhadkaCarruurta (ChildLine) oo ah 08001111 ama waxaa lagu xiri karaa: lambarka 0808 808 4994 (fariin = text 80849)